

Cusboonaysiin lagu sameeyay COVID-19 oo ku sabsan Talobixinta Xannaanada Ilmaha

Dib loo eegay 3-20-20 5:00 PM

King County ayaa adeegsanaysa istiraatiijiyado lagu yareynayo fiditaanka cudurada iyo dhimashada ay keentay COVID-19. Guddoomiyaha gobolka Jay Inslee wuxuu shaaca ka qaaday in iskuulada Washington oo dhan la xiri doono laga bilaabo Maarso 17-Abril 24. Waqtigaan, amarku kuma jiro xiritaanka daryeelka carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore. Intaa waxaa sii dheer, amarka mamnuucaya isu imaatinka in ka badan 50 qof sidoo kale kuma jiraan Xannaanada carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore. Xannaanada carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore waxay u adeegaan shaqo aad u muhiim ah iyagoo u oggolaanaya waalidiinta inay sii wadaan shaqada oo ay siiyaan meelo ammaan ah oo kobcisa carruurta si ay ku qaataan maalmahooda.

Maamulayaasha xanaanada cunugga waxay qaadi karaan talaabooyin muhiim ah si looga caawiyo kahortaga iyo u diyaargarowga kiisaska COVID-19 ee daryeelka xanaanada cunugga oo ay ku jiraan:

- Abuur qorshooyinka isgaarsiinta si loogu isticmaalo bulshada daryeelka ilmaha. Samee xiriir joogto ah oo lala yeesho dhammaan waalidiinta, carruurta, shaqaalaha, iyo iskaa wax u qabso ku saabsan [tallaabada qof walba qaadi karo si loo ilaaliyo naftooda ugana hortago fiditaan dheeraad ah](#). Ku dar fariimaha looga hortagayo dhaleecaynta iyo takoorida.
- Weydiiso waalidiinta inay eegaan heerkulka carruurtooda sidoo kale weydii shaqaalaha inay eegaan heer kulkooda maalin walba intaaysan u imaan xanaanada cunugga. Haddii heerkulku la simanyahay ama ka weyn yahay 100.4°F ama haddii qofku qufaco, san duuf jiro, ama cuno xanuun, u sheeg waalidiinta inay ku hayaan ilmahooda guriga iyo dadka kale, kana codso xubnaha shaqaalaha jirran inay joogaan gurigooda kana fogaadaan dadka kale.
- Xullo [dhaqdhaqaaqyo \(nashaadh\) dhiirrigeliya in boosas badan uu u dhexeeya carruurta](#).
- Sii Kordhin inta jeer ee aad [nadiifiso, fayodhowr, iyo jeermis dirtid](#) xarunta daryeelka ilmaha.
- Samee nidaam maalinle ah oo lagu garto laguna diro carruurta gur yahoodaiyo shaqaalaha buko. Haddii daryeelka ilmahaagu leeyahay kiis COVID-19, ka fikir inaad si ku meel gaarah u xirto si aad u nadafisid. Waqtigan u isticmaal si aad u go'aamiso inta xanuunku ku faafay. Tixraac dukumintiga, "Tilmaanta loogu talagalay Maamulayaasha Xannaanada Ilmaha: Maxa la Sameyaa Markaad bulshadaada Ka Hesho kiis COVID-19 ah"
- Ka Faallo, cusboonaysiin, iyo hirgelinta qorshayaasha xaaladaha degdegga ah.
- U qorsheyso oo aad isha ku hayso carruurta iyo shaqaalaha aan tegin xannaanada carruurta. Ururi macluumaadka ku saabsan maqnaanshahooda oo ku hay diiwaangelinta cudurada diiwaanka [jirrada](#) ee WAC 110-300-0465.
- La soco:
 - [Tilmaanta Maamulayaasha Barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee Mareykanka iyo iskuulada K-12 si loo qorsheeyo, loo diyaariyo, lagana jawaabo Cudurka Coronavirus 2019](#) (CDC)
 - [Kheyraadka iyo Xannaanada Cunugga](#) (Waaxda Caafimaadka Washington)

Talooyinka waa la cusbooneysiin karaa markii uu cudurku dillaacay. Caafimaadka Dadweynaha ayaa ka mahadcelinaya dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga markii aan wax ka qabanno caqabadaha maalinlaha ah ee COVID-19 u soo bandhigo bulshadeena. Warbixinno isdaba joog ah oo ku saabsan xaaladda soo ifbaxay: www.kingcounty.gov/covid1

- [Talooyinka CDC ee degmooyinka King, Pierce iyo Snohomish](#)
- [Waxa la sameeyo haddii aad xaqiijisay ama ay suurtoagal tahay kiis COVID-19, ama aad ka walwalsan tahay in aad yeelato COVID-19](#) (Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County)

Ka aqri faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan [talooyinka CDC ee degmooyinka King, Pierce iyo Snohomish](#).

Macluumaadka Shaqaalaha iyo Qoysaska

- [Cudurka Coronavirus 2019 \(COVID-19\)](#), oo ay ku jiraan xaashiyaha xaqiiqda la daabaci karo iyo ilo kale oo deegaanka ah (Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County)
- [Barta internetka ee Caafimaadka Bulshada](#), oo ay kujirto cusbooneysiinta maalinlaha ah iyo aragtida laga helo xirfadleyda Caafimaadka Dadweynaha (Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County)
- [Ku saabsan Cudurka Coronavirus 2019 \(COVID-19\)](#) (CDC)
- [COVID-19 iyo carruurta](#) (CDC)

Talooyinka waa la cusbooneysiin karaa markii uu cudurku dillaacay. Caafimaadka Dadweynaha ayaa ka mahadcelinaya dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga markii aan wax ka qabanno caqabadaha maalinlaha ah ee COVID-19 u soo bandhigo bulshadeena. Warbixinno isdaba joog ah oo ku saabsan xaaladda soo ifbaxay: www.kingcounty.gov/covid1